

SIDAY U SHAQEYAA TALLAALLADA COVID-19

Kani waa fayraska COVID-19.

Kuwaani waa fiiqaqa ku dhega gudaha cunahaaga, sankaa iyo indhahaaga. Markay fiiqyadu ku dhegaan, fayrasku jirkaaga ayuu galayaa oo waad bukoonaysaa. Haddii aad xanuunsan tahay, waxaad ku faafin kartaa fayraska qufac ama hindhishada.



Markaad hesho tallaalka COVID-19, wuxuu jidhkaaga barayaa inuu aqoonsado oo xasuusnaado fiiqaqa fayraska.



Tallaallada kuma jiraan fayraska dhabta ah, markaa kama qaadi kartid tallaalka COVID-19. Tallaalku ma beddelayo DNA-gaaga. Kuma jiraan wax maxsuul/walxo doofaar ah.

Waa caadi in waxyeellooyin laga helo tallaallada. Waxyeellooyinka waxaa ka mid noqon kara daal, jir xanuun, madax xanuun ama qandho fudud.



Si lagu tallaalo, fadlan wac 651-266-1198 oo dooro luqad markaad maqasho duubista.



Tallaallada qaarkood waxay u baahan yihiin laba tallaal si aad u hesho difaaca ugu fiican oo aadna dagaallanto fayraska.

- Moderna – 2 cirbad, oo ay u dhaxayso 28 maalmood.
- Pfizer – 2 cirbad, oo ay u dhaxayso 21 maalmood.
- Johnson & Johnson – 1 cirbad.



Haddii aad qaado COVID-19 kadib qaadashada tallaalka, jirkaaga ayaa garanaya fiiqaqa oo la dagaallamaya fayraska si aadan u bukoon/xanuunsan.